

# Descutan®

Si loo dhimo khatarta infegshanka ee nabarka meesha lagaa qalay ayay tahay inaad qaliinka ka hor jidhka oo dhan ilaa timaha saddex jeer ku meydho (laba jeer marinta) saabuunta jeermiska disha ee dubka lagu nadiifiyo ee Descutan®.

Descutan® waa mid warqad la'aan lagag soo iibsan karro farmasiiga. Weydiiso farmasiigaaga Descutan® bushqada maydhashada guriga (art.nr: 10 18 05). Descutan® bushqada maydhashada guriga waxa ku jirra dhamaan waxaad u baahantey ee laba jeer marinta.

Caadi ahaan waxa lagu sameeyaa labada hore ee laba jeer marinta guriga iyada oo ta ugu danbeysa lagu sameeyo cosbitaalka. Fiiri tilmaanta sida loogu meydhanaayo ee ku taala gadaasha warqadan.

Xog dheeraad ahí waxay la socotaa baakeedka, ama fiiri [www.fass.se](http://www.fass.se).



ATC D08AC02 Rx EF

Fresenius Kabi AB  
adeega macaamiisha  
tel: 020-116 68 44  
[kundservice@fresenius-kabi.com](mailto:kundservice@fresenius-kabi.com)  
[www.fresenius-kabi.se](http://www.fresenius-kabi.se)



**FRESENIUS  
KABI**

caring for life

# Laba jeer marintu - waa maxay?



1

Timaha ku maydh saabuunta dareeraha ah ee bacda ku jirta.

**FIIRO GAARA!** Ha marin Descutan® qeybaha maqalka, cudbi inaad isticmaasho ayaa lagu soo jeedinayaa. Ka ilaali inay indhaha kaa gasho.



2

Galka ka fur burushka oo ka buuxi biyo si aad u qoyso burushka. Jidhka si fiican u maydh:

- Wajiga, ka taxadir sanko agtiisa.
- Jidhka qeybta sare, khasatan kilaankilooyinka iyo xudunta.
- Dhabarka, waxa lagugula talinayaa inuu qof qaraabo ah ku caawiyo si saabuunta loo wada gaadhsiiyo dhamaan dhabarka.
- Jidhka qeybta hoose, lugaha iyo bowdada. Ka taxadir xubnaha taranka, gumaarka.

Jidhkoo dhan biyo kaga maydh.



3

Soo qaado burushka cusub oo ku soo wada celi dhamaan maydhashada hal mar oo kale.

Isku masax tuwaal nadiif ah. Xidho dar nadiif ah. Go'yaasha sariirta ka badal.